# Ha halis gelin.

## Iska fiiri calaamadaha maanta. Kansarka waa la daaweyn karaa haddii la qabto waqti hore oo ku filan.

Aqoonsiga calaamadaha kansarka mindhicirka, ilmo-galeenka/gynaecological iyo naasaha ayaa muhiim u ah ogaanshaha hore iyo daaweynta, taas oo si weyn u kordhin karta heerka badbaadada. Inaad ka warqabto isbeddelada jirka, sida dhiig-baxa aan la sharxi karin, xanuunka joogtada ah, burada ama kuuska, ama dheecanka aan caadiga ahayn, waxay kugu dhiirigelin kartan inaad hore u raadsato talo caafimaad.

Oggaanshaha hore iyada oo loo marayo wacyigelinta calaamadaha waxay u oggolaaneysaa daaweyn wax ku ool ah oo aan aad u weyneyn, hormarinta fursadaha soo kabashada iyo yareynta halista dhibaatooyinka.

**La hadal dhaqtarkaaga guud haddii aadan waxba ka hubin**



Si aad u hesho buug-yarahaan iyo macluumaadka kale oo ku qoran luqad kale, fadlan sawir lambarka QR

## Iska fiiri calaamadaha maanta. Kansarka waa la daaweyn karaa haddii la qabto waqti hore oo ku filan.

### Kansarka Mindhicirka

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan iskaan mari koodka QR ama la hadal dhaqtarkaaga guud

Khadka caawinta baaritaanka kansarka mindhicirka 0800 707 6060

### Calaamadaha

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan iskaan mari koodka QR ama la hadal dhaqtarkaaga guud

Khadka caawinta baaritaanka kansarka ilmo-galeenka 0808 802 0019

### Kansarka naasaha

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan iskaan mari koodka QR ama la hadal dhaqtarkaaga guud

Khadka caawinta baaritaanka kansarka naasaha 0808 800 6000

# Iska fiiri. Iska baar. Ka guuleyso!

Hore u ogaanshaha Kansarka Waxay **badbaadin kartaa nolosha**

Calaamadaha

Kansarka Mindhicirka

Kansarka naasaha

**Ha u siin fursad, iska fiiri, iska baar, ka guuleyso!**

# Kansarka Mindhicirka

**In ka badan 16,000 oo qof ayaa sanad kasta u dhimata kansarka mindhicirka ee dalka UK**

Kansarka mindhicirka waa nooca saddexaad ee ugu caansan kansarka. Baaritaanku wuxuu kaa caawin karaa ka hortagga kansarka mindhicirka ama ku ogaanshaha waqti hore, marka ay fududahay in la daaweeyo.

## Calaamadaha

- Dhiig ka soo baxa futada
- Dareemida daal mar walba laakiin ma hubo sababta
- Isbeddel ku yimaada caaddooyinkaaga saxarada. Waxaa laga yaabaa inaad aado marar badan ama ka yar ama aad qabtid shuban ama calool-istaag laga yaabo inuu yimaado oo tago.
- Xanuun ama barar calooshaada ah
- Iska dhimista miisaanka laakiin ma hubtid sababta

**Haddii aysan wax caadi kuu ahayn adiga, la xiriir dhakhtarkaaga guud**

## Baaritaanka

### Xirmada qalabka baaritaanka ee FIT

Waxaa loo diri doonaa cinwaankaaga guriga oo ku yaal diiwaanka dhakhtarkaaga guud. Xirmada baaritaanka waxaa lagu sameeyaa adigoo ku xoqaya usha muunada qaada saxaradaada (xaarka) ilaa dhammaadka usha la daboolo kadibna dib loogu celiyo dhalada muunada qaada. Ku qor taariikhda dhalada oo dib ugu soo dir boqshadda horay loo bixiyay isla maalintaas

**Da'da 50 ilaa 74**

**Qof kastaa waxaa laga baaraa 2dii sanaba mar**

Da'da 75 ama ka weyn — codso baaritaanka

# Kansarka Ilmo-galeenka

**99.8% ee kiisaska kansarka ilmo-galeenka ee dalka UK waa laga hortagi karaa.**

Baaritaanka ilmo-galeenka/Gynaecological waa hab looga hortago kansarka. Waxay baartaa fayraska dadka ee loo yaqaan papillomavirus (HPV). Khatarta sare ee HPV waxay sababi kartaa unugyada ilmo-galeenka inay noqdaan kuwo aan caadi ahayn. Ku dhowaad dhammaan kiisaska kansarka ilmo-galeenka waxay la xiriiraan halista sare ee HPV.

## Calaamadaha

- Dhiigbax aan caadi ahayn oo ka imaanaya xubinta taranka dumarka.
- Dhiigbaxa caada istaaga ka dib
- Xanuun iyo raaxo la 'aan inta lagu jiro galmada
- Dheecaan ka imaanaya xubinta taranka dumarka oo ur fiican lahayn
- Xanuunka lugta/miskaha ah
- Isdhimista miisaanka ee aan la filayn
- Daal Joogto ah

**Haddii lagugu martiqaado baaritaankaaga kansarka ilmo-galeenka adiga oo jira 24 sano, iyadoo ku xiran maalinta dhalashadaada, waxaad weydiisan kartaa dhakhtarkaaga guud/kalkaalisada inuu ku siiyo tallaalka HPV.**

## Baaritaanka

### Qaadista dhacaan yar

Baaritaanka waxay ka kooban tahay isticmaalka buraash yar oo jilicsan si aad muunad unugyo ah uga qaado makaanka afkiisa. Baaritaanka ma aha in laga fiirinayo kansarka laakiin in laga fiiriyo noocyada HPV

**Da'da 25 ilaa 49 Saddexdii sanaba mar**

**Da'da 50 ilaa 64 Shantii sanaba mar**

Qof kasta oo leh Ilmo-galeen waa inuu u tagaa baaritaanka ilmo-galeenka

# Kansarka naasaha

**Kansarka naasaha waa kansarka ugu caansan ee UK, oo matalaya 15% dhammaan kiisaska cusub ee kansarka,**

Baaritaanku wuxuu badbaadiyaa qiyaastii 1 nolol ee kansarka naasaha 200 kasta oo haween ah oo la baaray. Tani isku dardar waxey gareysa 1,300 oo qof oo laga badbaadiyay kansarka naasaha sanad kasta ee dalka UK.

## Calaamadaha

- Kuus ama buro ee naasaha ah
- Isbedelka iipta naaska oo gudaha gashey
- Guduud iyo kuleyl
- Bararka naasaha oo dhan ama qayb ka mid ah
- Dheecaan dhiig leh
- Buro ama kuus muuqda oo kilkisha saaran
- Maqaar dhuuduban ama godgodan
- Cuncunka maqaarka ama isbedelka tabashada

**Haddii aysan wax caadi kuu ahayn adiga, la xiriir dhakhtarkaaga guud**

## Baaritaanka

### Raajada naasaha (X-ray)

Waxaa lagu dhammaystiri doona 4 jeer 2 mar naas kasta waxana sameyn doona 1 ama 2 xubin dumar ah oo ka tirsan shaqaalaha.

**Da'da 50 ilaa 71 Saddexdii sanaba mar**

**Da'da 71 iyo wixi ka weyn wey codsan karan iyaga**

Baaritaanku wuxuu qaadan doonaa qiyaastii 30 daqiiqo.